



Tixraac:XRW/307/06/2021

Tariikh:19/06/2021

### Xeer Ra'iisul Wasaare

#### Ujeedo: Magacaabidda Xubnaha Dowlada Federaalka ay ku Dareyso Guddiyada Doorashada Dowlad Goboleedyada Xubnaha ka ah DFS

#### **Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;**

**Markuu Arkay:** Qodobbada 99-aad iyo 100-aad ee Dastuurka Ku-Meel-Gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**Markuu Arkay:** Habraaca Hirgelinta Heshiiska Siyaasadeed ee Hagaya Doorashada 2021 ee Heer Federaal iyo Guddiyada Doorashada Dadban ee 2021 ee Heer Dowladaha Xubnaha ka ah Dowlada Federaalka ee lagu saxiixay Magaalada Muqdisho, 1dii Oktoobar 2020, gaar ahaan Faqrada 2aad ee Mabaadi'da.

**Markuu Arkay:** Magacaabiddii xubnaha ay soo magacaabeen Madaxda Dowlad Goboleedyada Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka.

**Markuu Xeeriyay:** Mudnaanta ay leedahay Qabashada Doorashada Hay'adaha Dastuuriga si waafaqsan Dastuurka KMG iyo Heshiiska Qaran ee wada Saxiixeen Madaxda Qaranka

#### Qodobka 1aad Magacaabid

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS, wuxuu dib u magacaabay Xubnaha ay Xukuumada Federaalka ku buuxineyso Guddiyada Doorashada Heer Dowlad Goboleed, markii dib-u-eegis lagu sameeyey, ka dib heshiiskii 27 May, 2021, ay wada gaareen Dawladda Federaalka iyo Dowladaha xubnaha ka ah dawladda Federaalka, kuwaas oo ah Sadex (3) Xubnood oo lagu darayo Sideeda (8) Xubnood ee ay Madaxda Dowlad Goboladu soo magacaabeen, waan sida hoos ku xusan:

#### **Xubnaha Dhameystiraya Guddiga Doorashada Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed:**

1. Cabdullaahi Xasan Aadan
2. Saciid Sheekh Cabdi Cusmaan
3. Maxamed Cabdullaahi Sheekh Xasan

#### **Xubnaha Dhameystiraya Guddiga Doorashada Dowlad Goboleedka Puntland:**

1. Mukhtaar Cabdullaahi Cartan
2. Maxamed Caseyr Cabdulle.
3. Eng. Salaad Xareed Cali

**Xubnaha Dhameystiraya Guddiga Doorashada Dowlad Goboleedka Hirshabeelle:**

1. Aamino Cabdullaahi Cusmaan
2. Cabdisalaam Maxamed Xaaji Ciise
3. Maxamed Mukhtaar Cali.

**Xubnaha Dhameystiraya Guddiga Doorashada Dowlad Goboleedka Galmudug:**

1. Maxamed Xuseen Maxamed
2. Axmed Xuseen Shire
3. Kamaal Salaad Xasan

**Xubnaha Dhameystiraya Guddiga Doorashada Dowlad Goboleedka Jubbaland:**

1. Cabdullaahi Jaamac Hiirad
2. Axmed Maxamed Xuseen
3. Cabdi Jaamac Xasan

**Qodobka 2aad**

- B. Xubnaha ku xusan Qodobka 1<sup>aad</sup> waxaa ay ku biirayaan Xubnaha Sideeda ah ee ay soo xuleen Madaxda Dowlad Goboleedyada Xubnaha ka Dowladda Federaalka ah.
- T. Guddiyada Doorashooyinka waxaa lagu dhisay Heshiiska Qaran ee Madaxda Dowladda Federaalka ah iyo Madaxda Dowlad Goboleedyada Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka, waxa ayna ku shaqeynayaan Hanaan Waafaqsan Dastuurka KMG.

**Qodobka 3aad**

Dhaqan-galka Xeerka

Magacaabiddani waxa uu dhaqan-galayaa isla marka uu saxiixo Ra'iisul-Wasaaraha Xukuumadda JFS.

Fulin Wacan.



**Mudane: Maxamed Xuseen Rooble**  
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**